

Xarunta Xogta Codbixiyaha Michigan – Doorashada koowaad ee Agoosto 2-deeda

Diyaar ma u tahay in aad codeyso Agoosto 2-deeda ee doorashada koowaad?

Waa doorasho muhiim ah, waxaa ka mid ah tartamo soo saari doono saraakiisha gobolka iyo deegaanka, xubno ka mid ah garsoorka iyo xubno ka mid ah Koongareeska.

Adiga oo qorsheynayo sida aad u codeyn lahayd sanadkan, waxaan kugula talinaynaa in aad booqato **Michigan.gov/Vote**.

Halkan waxaa lagahelaa shay yaasha qaar aad ku sameyn karto shabakada:

- Hubi si aad u aragto in aad diiwaangalsan tahay si aad u codeyso.
- Isdiiwaangeli si aad u codeyso, ama cusboonaysii diiwaankaaga, ilaa laba asbuuc ka hor Maalinta Doorashada. Markaa kadib, wali waad isdiiwaangelin kartaa waadna cusboonaysiin kartaa, laakiin waxaad u baahan tahay in aad intas ku sameyso xafiiska karraaniga ee deegaan doorashadaada.
- Codso warqada codbixinta maqanaanshaha ama warqada codbixinta maqanaansha la adeegsan karo si aad u codayn karto adigoo joogo gurigaaga.
- Dabagal waraqadaada codbixinta maqanaanshaha si aad u xaqiijiso marka adiga uu kusoo dirayo karraaniga iyo markaad dib ugu celiso isaga.
- Hel xogta lagala xariiro karraanigaaga.
- Hel booska sanduuqyada ee lagu rido warqada codbixinta iyo goobtaada codbixinta.
- Arag tusaalaha warqada codbixinta ee aaggaaga.

Doorashadan, ka hel waxwalbo oo aad rabto hal meel: **Michigan.gov/Vote**